



**Akoonka hay'adaha
aan dawliga ahayn (NGOs)**

myBank
Wherever you go

Hay'adaha aan dowliga ahayn (NGOs), waxay door muhiim ah ka ciyaaraan badbaadinta nolosha dadka tabaalaysan iyo hawlaha kale ee horumarineed ee ka socda Soomaaliya. Hay'adahani waxay sidoo kale ka mid yihiin ilaha ugu muhiimsan ee dakhliga ama deeqaha loo soo marsiiyo Soomaaliya.

Hay'adaha aan dowliga ahayn (NGOs), waxay leeyihiin baahiyo bangiyeed oo kala duwan oo ay ka mid yihiin; soo gaarsiinta lacagaha dibedda uga imaanaya (Incoming swift); sii qaybinta deeqaha ay dadka gaarsiinayaan, diyaarinta warbixinno xisaabeed oo la isku hallayn karo, iyo hawlo kale oo la xiriira kor-joogteynta, qiimaynta iyo isla xisaabtanka ay ka filanayaan hay'adaha waaweyn ee ay mashaariicda la fulinayaan. Waana middaas sababta aan u sameynay akoonkan ku habboon baahida NGOs-ka ee gaarka ah.

Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Jeeg buug ka kooban 100 xaashi.
- Waxa aad si sahlan oo online ah u bixin karataa mushaarka shaqaalahaaga.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Si sahlan (Online ah) oo aad isaga bixin karto dhamaan biilasha iyo lacagaha kale ee lagugu soo dallaco sida biyaha, korontada, TV-ga, Kharajaadka laysanka NGO-ga iyo qaybo kale oo badan.
- Qaybinta lacagaha deeqaha ah ee la siinayo dadka taagta daran si electronic ah oo sahlan.
- Internet banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.
- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- Waxaa lagu samaynayaa qof aad si gooni ah ugala soo xiriirto dhamaan waxyaalaha aad bankiga uga baahato.

Shuruudaha Furista Akoonkan:

1. Aqoonsiga (National ID ama passport) agaasimayaasha NGO-ga.
2. Koobi xeer-hoosaadka lagu aasaasay NGO-ga.
3. Laysanka NGO-ga.
4. Cinwaanka halka uu degenyahay NGO-gu.
5. Labo sawir oo nooca passport-ka ah oo laga rabo cid kasta oo akoonka saxiixaysa.
6. Aqoonsiyada (ID, Passport IWM) cidda akoonka saxiixaysa ama maamulaysa (Waa haddii ay ka duwanyihiin agaasimiyaasha NGO-ga).
7. Warqad codsi ah oo agaasimayaasha NGO-gu u soo qoraan bankiga, iyaga oo ku codsanaya in akoonka loo furo, isla markaana ku caddaynaya cidda iyo habka akoonka loo maamulayo.
8. Caddaynta ilaha dakhligu ka soo galo NGO-ga.



 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 info@mybank.so

 www.mybank.so

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location
Mogadishu, Somalia

